



Waalidiinta Raja sare ka leh Waxbarashada Ilmahooda

Hagid Loogu Tal-galay Waalidka: Imtixaanada Dugsiga Ilmahooda. Waxa loo baahan yahay in aad Ogaato

(A Parent's Guide to School Testing: What You Need to Know - Somali)

Ardaydu waxa ay qaataan imtixaano farabadan. Labada ugu "wayni" waa imtixaanka gobolka ee qiimaynta (Minnesota Comprehensive Assessments, MCAs) iyo imtixaanka xaga kartida ama farsamada (Basic Skills Test). Sababta ay labadaa imtixaan ugu muhiimsanyihiin iyo sidii aad ilmahaaga uga caawin lahayd in uu natiijo fiican keeno.

Imtixaanka Lagu Cabiro Fahmada ee Gobolka Minasoota.

Kuwaase waa imtixaanaad xaga akhriska iyo xisaabta ku saabsan. Skuulada minasoota waxa sanadkiiba ardayda ku jirta fasalda 3-8 iyo iskuulka sare ay ka qaadaan imtixaan. Imtixaanadaasina waxa lagu qiyaasa arday waliba heerka uu ka taaganyahay cabiraada gobolka.

Skuuladau waxa ay imtixaanaadkaa uga qaadan ardayda si ay u ugaadan heerka wax fahamka iyo xirfadaha (concepts & skills). Marka ilmahaagu uu qaato imtixaankaas, waxa lagu soo dirayaa warbixin ku saabsan natiijada iyo hor umarkiisa. Warbixintu:

- Waa mid ku wargalinaysa natiijada ilmahaaga xaga akhriska iyo xisaabta.
- Heerka ilmahaagu taaganyahay marka lagu cabiro ardayda kale ee gobolka.

Imtixaanka akhriska waxa ah sheeko la sameeyay iyo kuwo kaleba sida gabayga, sheeko yar ama warbixin. Xaga xisaabta, ardaydu waxa ka shaqeeyaan su'aalo kala gadisan oo u baaahan xirfad iyo cabiraad ah dhinaca khibrada.

Ardaydu kuma barmuusaan kumana dhacaan imtixaanka gobolka ee qiimaynta. Laakiin waalidka iyo skuulka ayaa waxa ay ka korodsadaan warbixin sida ardaydu ku yihiin akhriska iyo xisaabta. Waxa aad warbixinta ku ogaan kartaa hor umarka ilmahaaga. Skuulkuna waxa uu warbixinta u isticmaali karaa sidii ay wax u bari lahaayeen ardayga

Ka caawi ilmahaaga sidii uu isugu diyaarin lahaa imtixaanaadka

Waxbadan ayaad ka Qaban kartaa si uu ilmahaagu u keeno ama u keento natiijo fiican.

Guud ahaan:

- Isku day in ilmahaagu la sii qabsado habka imtixaanka. Waxa aad iskuulka ka codsan kartaa qoraalada imtixaanaad hore (sample).
- Ku dhiiri gali ilmahaaga in uu ka qayb qaato tababarka isku diyaarinta imtixaanka eee lagu qabto skuulka iyo gurigaba.
- Isku day in ilmahaaga hore u seexiso si uu hordo fiican u helo iyo qureec fiican oo nafaqo leh imtixaanka ka hor.

Akhriska

- Isku day in aad u akhrido ilmahaaga adiga oo ku dhiiri galinaya in uu kuu akhriyo.
- Ku dhiiri gali ilmahaaga in uu isku dayo isu gaynta erayada kala baahsan iyo in oo ka jawaabo su'aalaha ku qoran maqaalda (news paper)

Xisaabta

- Ku dhiiri galay ilmahaaga in uu isticmaalo xisaabta. Isku day in uu ku barto xisaabta isaga oo isticmaalya alaabta dukaanka lagasoo gado, adiga oo ka caawinaya in uu isticmaalo waxyaabaha ku yaal maqaalda iyo waxyaabaha laga sameeyo cunada.
- Waxa aad sameysaa ciyaaro ku lug leh numbaro ku lu leh xisaabaadka.

Imtixaanka qiimaynta kartida iyo MCA-II/ Grad Tests

Gobolka minnesota ardaydu dhamaan waa in ay qaataan dhawr imtixaan oo kala dambeeya akhrinta, xisaabta, iyo qoraalka si ay u qalin jabiyaan. Ardayda qalin jabin doonta sanadka 2009 waxa ay qaadan doonaan imtixaanka qiimaynta kartida iyo khibrada (basic skills test), ardayda qalin jabin doonta sanad kabacdina waxa ay qaadan doonaan imtixaanka MCA-II/GRAD. Ardaydu imtixaanka dib ayay uqaadan karaan hadii ayna ku guulaysan marka u horaysa. Waalidka waxa loo dira natiijada imtixaanka ee ilmahooda.

Waxa ay imtixaanadaasi u fasaxaan in ay ardaydu ku muujiyaan aqoontooda iyo kartidoodaba. Waana hab u fiican gobolka Minnesota marka loo eego waajibkaadka ka saaran ardayda. Sharciga dawlada dhexe kasoo baxay ee loo yaqaan ilmo laga tagayaa majiro (No Child Left Behind) ayaa iskuulada faraya in ay aradyda la gaadsiyo heer qiyaasan. Natiijada imtixaankaasina waxa ay muujiyaan skuuladu fuliyeen waajibkoodii iyo in kale. (waxad fiirisaa 'waa maxay hor umarka sanadka)

Ka caawi ilmahaaga isu diyaarinta imtixaanada.

Waalid ahaan, waxa aad ilmahaaga u caawin kartaa siyaabo badan. Waxa ka mid ah:

- Meel ilmahaagu ku akhristo u diyaare.
- Ku dheeri gali in ilmahaagu uu yeesho wakhti go'an uu akhristo kana shaqeeyo wixii u baahan in guriga lagaga shaqeeyo (homework).
- Ku dheeri galay in uu ilmahaagu akhristo maqaalda (newspaper) iyo buugaagta.
- Ku dheeri galay ilmahaagu in uu isticmaalo wax ku lug leh xisaabta.

Su'aalo?

Wax su'aal ah miyad ka qabta xagga Imtixaanada dugsiga? Waxad wici karta maamulaha dugsiga ilmahaaga. Waxad kalo soo wici karta Hassan Samantar ee xarunta PACER Center (952) 838-1334 oo waxad codsan karta in uu kala shaqeeyo mashruuca waalidiinta rajada sare ka leh ilmahooda.

Hey'adda PACER wa hey'ad Faa'iido aan u shaqeyn (nonprofit) ee gobolka Minnesota. Waxey saacidaa xuquuqaha waxbarashada caruurta dib u-dhaca leh iyo kuwa aan laheyn. Waxey bixisa tababaro, cawinaad shaqsiyeed, akhbaaro qoraal ah iyo wax sii dheer.